
# Taabbudnimada Ereyga Magac iyo Adeegsigiisa

***Cabdiraxmaan Faarax "Barwaaqo"***
hal_aqoon@yahoo.com



U.S. Department of Health and Human Services
NIH News
National Institutes of Health

National Institute of Child Health and Human Development (NICHD)

FOR IMMEDIATE RELEASE
Tuesday, September 14, 2004

CONTACT:
Robert Bock or
Marianne Glass Miller
301-496-5133

E-mail this page
Subscribe

**Children Follow Same Steps To Learn Vocabulary, Regardless of Language Spoken**

Regardless of the language they are learning to speak, young children learn vocabulary in fundamentally the same way, according to a study by researchers at the National Institute of Child Health and Human Development of the National Institutes of Health.

The researchers found that, for the seven languages studied, nouns comprise the greatest proportion of 20-month-old children's vocabularies, followed by verbs and then adjectives.

The findings appear in the July-August issue of *Child Development*.

"This study shows that while languages may differ greatly, the sequence by which young children learn the parts of speech appears to be the same across different languages," said Duane Alexander, M.D., Director of the NICHD. "By learning about the normal progression of language development, we may be able obtain information that will help children who are having difficulty learning language."

For the study, Marc Bornstein and Linda Cote, researchers in NICHD's Child and Family Research Laboratory collaborated with researchers in Argentina, Belgium, France, Israel, Italy and the Republic of Korea to study language development in children learning to speak Spanish, Dutch, French, Hebrew, Italian, Korean, and American English.

In all, 269 mothers of children age 20 months took part in the study. Of the children in the study, 117 were girls, and 152 boys. All of the children were firstborn, had been born at term and spoke only one language (the main language of the community they lived in.) The mothers filled out a standardized questionnaire designed to gauge the extent of their children's vocabularies. The questionnaire included examples of nouns, verbs, adjectives, and "closed-class" words — pronouns, question words, prepositions and articles, and quantifiers.

"Specifically, mothers in every country reported that their children said significantly more nouns than any other word class (verbs, adjectives, closed-class words)," the researchers wrote.

The researchers added that the finding held true regardless of whether the language spoken

http://www.nih.gov/news/pr/sep2004/nichd-14.htm 1/27/2006

Magac waa erey af Soomaaliya, waana erey gaaban oo ka kooban 5 dhawaaq (3 shibbane iyo 2 shaqal). Laga gaaban, lagana dheer. Hayeeshee, lagama taabbudsana lagamana adeegsi badna. Qoraalkan kooban oon filayo inuu innoo bidhaamindoono taabbudnimada ereygaa waxan marka hore ku eegi ujeeddooyinkiisa iyo siyaabaha loo adeegsado. Waxan raacin, oon tilmaan yar ka bixin, sida, kolka ereyga *horgale,* ama *dibgale,* ama *erey kalaba* loogu kordhiyo, ama isagaba dhexroore looga dhigo, ay ujeeddooyinkiisu isu beddelaan. Waxan iyana sheegi meelaha ereygan iyo ujeeddadiisu ku soo arooreen sida maahmaahaha, maansada iyo Diinta Islaamka. Ugu dambaynta waxan soo bandhigi yaabkii Cilmibaadhistii u dambeysey lagu ogaaday iyo kaalinta ay magacyadu kaga jiraan barashada afafka yar iyo weynba.

Ereyga 'magac' haddii aad ka baadho Qaamuuska af Soomaaliga (Yaasiin C. Keenadiid 1976) waxad arkaysaa inuu leeyahay dhawr ujeeddo. Ta u horreysa waxa uu ku sheegayaa inuu yahay: [waa] *erey ama tix, qof ama wax kale magac looga dhigay oo loogu yeedho.* Waa run midhkaasu oo qof kastaa wuxu leeyahay magac ujeeddo leh oo loo yaqaan, isaguna isu yaqaan. Dalkastaa magac u gaar ah oo loo yaqaan buu leeyahay. Buug ama wargeys aan magac lahayni ma jiro. Magaalo kasta oo adduunka jirtaa magac u gaar ah bay leedahay. Duunyada aynu dhaqannaa waa sidoo kale. Jaamacad ama dugsi magaclaawe ihi ma jiro.

Ujeeddada labaad ee ereygu waxa weeye: *hadal wanaagsan oo qof u meel mara*, haddii aan si kale u nidhaa waa maamuus. Tan qudheedu waa dhab. Haddaan qof ku idhaa: *magacaa be*' ! Waan habaarayaa oo waxaan ku habaarayaa inuu maamuus beelo oo wixii uu sharaf lahaa dhulka galaan. '[hebel] *waa nin magac leh',* haddaan idhaa waxan ujeedaa waa qof sharaf leh oo la tixgeliyo. Hadduu qof kugu yidhaa, " *magaca Soomaaliyeed ha dilin*!", wuxu ujeedaa sharafteenna dhawr oo hayna maamuus ridin.

Ujeeddada saddexaad waa tu dhanka naxwaha ah, waxaanu abwaanku tilmaamayaa inuu magac yahay qayb ka mid ah qaybaha hadalka. Tusaale ahaan, ereyada geed, caano, dhul, Samakaab, qurux, foolxumo, dhabcaalnimo, dad iwm., waa magac.

Ereyga 'magac' haddaan *dibgale* ku ladhno wuxu yeelanayaa ujeeddo kale. Tusaale ahaan, Haddii dibgalaha '**-ow**' aan ereyga '*magac*' ku ladhno wuxu noqonayaa '*magacow*'. Waxaanu noqday fal. Ujeeddadu waa magaciisa sheeg. Haddii aan ku idhaa: *magacow qofkii warkan kuu sheegay*. Waxan u jeedaa sheeg magaca qofkii warkan kugu yidhi. Dibgalaha "**-dheb**" haddaan raaciyo wuxu noqon "*magacdheb*" oo ah carrabbaad ama soo hadal qaad. Tusaale ahaan, haddaan ku idhaa: N*inkaasi qofna muu magacdhebin*. Waa qofna magaciisa sooma hadal qaadin. '-**uyaa**l' haddii la raacsho wuxu noqon 'magacuyaal' oo ujeeddadiisu tahay kii meeshii magaca galay. Tusaale ahaan halkii aad magac ka

adeegsan lahayd waxaad halkiisa gelineysaa magacuyaal sida: *isagaa cunay*. *Anigaa bixiyey lacagtii, iw*m.
Ereyo aan kala dhantaallayn kolka xagga dambe laga raaciyo ujeeddo kale ayuu ereygi yeelanayaa. Tusaale ahaan haddii aan nidhaa: *waa qof magac wanaagsan*. Waxan u jeedaa waa qof magac fiican leh oo la tixgeliyo. Haddaanse idhaa: waa qof magac xun. Waa taas hore lidkeeda.

Kolka horgale lagu ladhana iyana ujeeddadiisi way is beddeleysaa. Tusaale ahaan, haddii aan 'u' ka horreysiinno ereygii 'magacow' wuxu noqonayaa 'u magacow' oo ujeeddadiisu tahay meel u xilsaar ama jago u dhiib.

Marka ereyga laftiisa dhexroore laga dhigo waa sidoo kale oo ujeeddo kale ayuu yeeshaa. Tusaale ahaan, haddii aan nidhaa '*ugu magac dar*', ujeeddadiisu waa qof kale magaciis ilmahan u bixi. Hayeeshee '*u magac bix*i' waa ilmo kolkaa dhashay magac cusub u bixi.

Intaa haddii aan ka gudbo bal aan eegno meelaha uu ereyga magac ku soo arooray. Haddaan dabagal ku samayno waxan soo heleynaa meelo dhawr ah oo uu ereygaasi ku soo arooray. Meelahaasi oo ay ka mid yihiin:

**Maahmaahaha:**

1. *Magacaaga wax badan baa yaqaan, muuqaagana waxa yar*. Waxa halkaa ka cad inuu magacu kaa dheereeyo oo dad badani ayakoon ku arag ama aanad adba la kulmin ay ku yaqaannaan. Laba arrimoodba way kugu maqli karaan: magac xumaan iyo magac wanaagsanaan labada.

2. *Magac bilaash uma baxo*. Iyana waa maahmaah kale oo tilmaamaysa inuu magac kasta oo labbixiyaa uu leeyahay ujeeddo ee aanu iska bixin.

3. Magac iyo masiibaba maalin bay dhacaan. Tan iyana ujeeddadeedu waxa ay tilmaamaysaa in magac wanaagsanida iyo masiibaduba ay maruun dhacaan. Tusaale reer dhan oo dhisan ayaa maalin qudha masiibo ku habsataa oo la mooraduugaa. Haddii magac Eebbe ku siinayana waa sidaasi oo kale oo maalin uu baa laguu gacan haadiyaa oo hawl aad qabatay magac kuu soo jiiddaa.

4. *Magac miskiin lagama aha*. Maahmaahdani waxay tilmaamaysaa in qofkastaa jecelyahay inuu magac wanaagasan yeesho.

5. *Magac iyo lacagiba dadka way dooriyaan*. Tan qudheedu waxay innoo sheegeysaa in sida lacagta badani qofka hab nololeedkiisa u beddesho uu magaca wanaagsanina u beddelo.

**Suugaanta:**

Suugaanta lafteeda waa loo adeegsadaa ereygani kolka uu ujeeddadiisu maamuus tahay. Tusaale ahaan, maanso uu tiriyey Gaarriye ayaa waxa ku jira tuduca ah:

> *Magac waa qasaalade wallee qado ma dhaafsado.*

Gaarriye wuxu inna hogatusaalaynayaa inuu maamuusku u maydhmo sida uskaggu u maydhmo. Sidaasi awgeed wuxu halkan ku muujinayaa inaanu sharaftiisa qado dhaafsan doonin oo aanu noqondoonin nin lagu tilmaamo inuu dhuuniraac yahay.

**Diinta:**

Ujeeddada saddexaad ee ereyga magac wuxu ku soo arooray Diinta Islaamka. Sida ku xusan Aayadda 31aad ee *Suuradda Al-Baqarah* ee Kitaabka *Quraanka* wuxu Eebbe, Korreeyoo hufnaaye, innoogu sheegay in kolkii uu abuuray **Nebi Aadam** (Nabadi Korkiisa ha ahaatee) uu baray magacyada. Waxaanay Aayaddu tidhi:

وَعَلَّمَ ءَادَمَ ٱلْأَسْمَآءَ كُلَّهَا ثُمَّ عَرَضَهُمْ عَلَى
ٱلْمَلَٰٓئِكَةِ فَقَالَ أَنۢبِـُٔونِى بِأَسْمَآءِ هَٰٓؤُلَآءِ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿٣١﴾

***Al-Baqarah***

*Haltebintii ay wadaaddadu ka bixiyeenna waa kuwan hoos ku qoran:*

***Soomaali:***

*31. Eebbe wuxuu baray Aadam magacyada dhammaan, markaasuu u bandhigay Eebe malaa'iigta kuna yidhi iiga warrama magacyada kuwaas haddaad runlowtihiin*

***Ingiriisi:***

*31 - And he taught Adam the names of all things; then He placed them before the angels, and said: Tell Me the names of these if ye are right".*

***Carabi:***

هذا مقام ذكر الله تعالى فيه شرف آدم على الملائكة بما اختصه من علم أسماء كل شيء دونهم وهذا كان بعد سجودهم له،وإنما قدم هذا الفصل على ذلك لمناسبة ما بين المقام وعدم علمهم بحكمة خلق الخليفة حين سألوا عن ذلك، فأخبرهم تعالى بأنه يعلم ما لا يعلمون، ولهذا ذكر الله هذا المقام عقيب هذا ليبين لهم شرف آدم بما فضل به عليهم في العلم فقال تعالى: { وَعَلَّمَ ءَادَمَ ٱلأَسْمَآءَ كُلَّهَا} قال السدي عمن حدثه عن ابن عباس { وَعَلَّمَ ءَادَمَ ٱلأَسْمَآءَ كُلَّهَا} قال: عرض عليه أسماء ولده إنساناً إنساناً والدواب فقيل: هذا الحمار، هذا الجمل، هذا الفرس، وقال الضحاك عن ابن عباس { وَعَلَّمَ ءَادَمَ ٱلأَسْمَآءَ كُلَّهَا} قال: هي هذه الأسماء التي يتعارف بها الناس إنسان ودابة وسماء وأرض وسهل وبحر وجمل وحمار وأشباه ذلك من الأمم وغيرها، وروى ابن أبي حاتم وابن جرير من حديث عاصم بن كليب عن سعيد بن معبد عن ابن عباس { وَعَلَّمَ ءَادَمَ ٱلأَسْمَآءَ كُلَّهَا} قال علمه اسم الصحفة والقدر، قال نعم حتى الفسوة والفسية، وقال مجاهد { وَعَلَّمَ ءَادَمَ ٱلأَسْمَآءَ كُلَّهَا} قال علمه اسم كل دابة وكل طير وكل شيء، كذلك روي عن سعيد بن جبير وقتادة وغيرهم من السلف أنه علمه أسماء كل شيء، وقال الربيع في رواية عنه أسماء الملائكة. وقال حميد الشامي أسماء النجوم. وقال عبد الرحمن بن زيد علمه أسماء ذريته كلهم، واختار ابن جرير أنه علمه أسماء الملائكة وأسماء الذرية لأنه قال { ثُمَّ عَرَضَهُمْ} وهذا عبارة عما يعقل وهذا الذي رجح به ليس بلازم،

***Ibn Kathiir***

Sida kor ka muuqata, ma jiro wax oddoros ah oo tilmaamaya saamaynta ay dadka ku leedahay aqoontii Eebbaheen Aadam baray markii uu abuuray. Haseyeeshee baadhitaannadii la sameeyey ayaa loo adeegsan karaa iney arrintaasi saamayn weyn ilaa hadda dadka ku leedahay.

**Wixii baadhitaannadii u dambeeyey ay tilmaameen:**

Qoraal laga soo saaray baadhitaan, uu hirgeliyey Machadka la yidhaa *National Institute of Health* oo ka tirsan Wasaaradda Caafimaadka ee dalka Maraykanka ayaa arrin la yaab leh lagu soo bandhigay.

Qoraalkaasi oo ladhkiisu ahaa *"Children follow same steps to learn vocabulary, regardless of language spoken"* laguna soo saaray warsidaha *"Child Development*" tirsigii soobaxay *Juulaay-Ogost ee 2004ta*, ayaa sheegay in carruurtu isku si u barato afafka. Qoraalku wuxu intaa ku daray in habka ay carruurtu u barato ereyada afka, afkasta habaranayaane, uu isku mid yahay.

Baadhayaashu waxay ku ogaadeen toddoba af oo ay baadheen in magacyadu ugu badanyihiin ereyada ay bartaan carruurta da'doodu tahay 20ka bilood, kadibna barashada falalka iyo tilmaamayaashu ku xigaan. Guud ahaan waxa baadhitaankaasi ka qayb qaatay 269 hooyo iyo carruurtoodii oo jira 20 bilood. 117 ka mid ah carruurtaas ayaa hablo ahaa, 152ka kalana wiilal bay ahaayeen. Ilmo kastaa wuxu ahaa curadkii ama curaddii reerka. Mid kasta oo carruurtaa ka mid ihi wuxu ku hadlaa af qudha. Hooyooyinka carruurtaasi baa ka warcelinayey weydiimo isku mid ah oo baadhitaankaa loogu talagalay. Weydiimaha waxa ka mid ahaa ereyo magacyo ah, dar falal ah iyo qaar tilmaamayaal ah. Waxa kale oo ka mid ahaa kuwa loo yaqaan ereyada oodan (sida magacuyaallada iyo qodabbada). Hooyo kastaa waxay sheegtay inuu ilmaheedu ku hor hadlay ereyada magacyada ah, kadibna falalka iyo tilmaamayaasha.

*Marc Bornstein* iyo *Linda Cote* oo baadhayaal ka ah ***NICHD*** ayaa baadhitaankan gacansaar kala yeeshay baadhayaal ka kala tirsan dalalka *Arjantiina, Beljiyamka, Faransiiska, Yuhuudda, Talyaaniga iyo Jamhuuriyadda Kuuriya* si ay u ogaadaan sida barashada afafka carruurtu u kobocdo.

*Dr. Bornstein* baa tidhi, "Waxa jira hab laga simanyahay oo ay carruurtu afka u barato." Waxa kale oo ay dhakhtarkaasu tibaaxday in sababta ay carruurtu magacyada u horbartaan tahay magacyada oo ah wax la taaban karo iyo wax la arkikaro, halka ay falalka iyo tilmaamayaashu ka yihiin wax dahsoon oon maskaxda carruurtu qaban karin.

Dhanka barashada afafka, in kasta oo aanan sheegikarin iney barayaashii dejiyey buugaagta dhallaanka da'doodu u dhaxayso saddex bilood – 23 bilood ee loogu talagalay in lagu baro akhriska ay yaqaanneen aragtidan iyo in kale, haddana waxad dareemeysaa in badiba buugaagtaasi ku salaysan yihiin aragtida kor ku xusan. Buugaagtaasi waxay carruurtu ka barataa magacyada xubnaha jidhka, xoolaha kuwa badda iyo dhulkaba, qaababka, qalabka guryaha lagu adeegsado, iwm. Waxa iyana la yaab leh in sida afafka loo baro dadka waaweyni la mid tahay sida dadka yaryar loo baro. Qofkasta oo baranaya sida loo qoro af aanu lahayn waxa lagu bilaabaa barashada dhawaaqa xuruufta afka uu baranayo. Intaa ka dib waxa la baraa ereyo gaaggaaban sida kuwa xubnaha jidhka, dhismayaasha, qalabka dugsiga yaalla, kuwa guryaha lagu adeegsado, iwm.

Mar aan warsaday Liibaan Axmed, oo ah bare Soomaaliyeed, oo af Soomaaliga ka dhigijirey xero qaxooti oo ku taal dalka Yaman wuxu ii sheegey in buugaagtii ay adeegsan jireen oo ay soo diyaarisay UNESCO ereyadii u horreeyey ee ardayda la barijirey ay ka mid ahaayeen ereyada:

Bar
Baal
Beer

Waxa halkaa innooga muuqda in ereyadaasi dham-maantood yihiin kuwii aan hadal hayney ee ahaa magacyada. Mar aan dhugtey buugga la yidhaa "*Aftahan:barashada af Soomaaliga*" (Cabdifataax M. Yuusuf 2003) oo loogu talagalay in af Soomaaliga laga barto, ayaad dareemeysaa inuu isna aragtidaasi ku salaysanyahay. Xarafkasta kolka dhawaaqiisa la sheego

Israaca Shaqalada iyo Shibbanayaasha (B & T)

| Shaqal Gaaban | Tusaale | Shaqal Dheer | Tusaale |
|---|---|---|---|
| | | **B** | |
| Ba | **Bad** | Baa | **Baal** |
| Be | **Berri** | Bee | **Beer** |
| Bi | **Bil** | Bii | **Biirin** |
| Bo | **Bocor** | Boo | **Bood** |
| Bu | **Burris** | Buu | **Buug** |
| | | **T** | |
| Ta | **Tabar** | Taa | **Taallo** |
| Te | **Tegid** | Tee | **Teeb** |
| Ti | **Timo** | Tii | **Tiir** |
| To | **Toban** | Too | **Toon** |
| Tu | **Tuhun** | Tuu | **Tuug** |

waxa la sheegayaa dhawr erey oo uu dhawaaqu ku jiro. Tusaalooyinka uu buuggu qoray badankoodu waa magacyo.

Ugu dambayn, qoraalkan oon ku eegayey ujeeddooyinka ereyga magac iyo sida uu isku beddelo kolka wax la raaciyo ayuu baadhitaankaasi innoo caddaynayaa taabbudnimadiisa iyo in barashadii uu Eebbaheen ku baray Nebi Aadam magacyada ay saamayn weyn ilaa hadda dadka ku leedahay, yar iyo weynba, kana muuqato barashada afafka iyo adeegsiga eraygaasiba.

Raadraac

Cabdiraxmaan C. Faarax "Barwaaqo*".* *Magac Bilaash Uma Baxo: Ujeeddooyinka magacyada iyo Naanaysaha Soomaaliyeed, published by the author, Ottawa, September 1998. 1st edition. x, 209pp.*

_____ "*Ujeeddooyinka magacyada magaalooyinka Soomaaliyeed*", Ottawa: Hal-aqoon, xidhmada 1aad, tirsiga 3aad, Gu' 2001/Vol.1,No.3 Spring 2001.

______ "*Ujeeddooyinka magacyada Xoolaha dheddig*", Ottawa: Hal-aqoon, xidhmada 1aad, tirsiga 1aad, Dayr 2000/Vol.1,No.1 Fall 2000.

Georgi Kapchits. *Qaamuuska maahmaahyada Soomaaliyeed*, Moscow, 1998

*Quraanka Kariimka iyo Tarjumada Macnihiisa ee afka Soomaaliga,* , Madbacadda Boqor Fahad, Al-Madina Al-Munawara, Sacuudi Areebiya.

*The Holy Quran English translation of the meanings and Commentary*, King Fad Holy Quran Printing Complex, Al-madina Alminawara, Saudi Arabia.

*Yaasiin C. Keenadiid, Qaamuuska af Soomaaliga, Muqdisho, Wakaaladda madbacadda qaranka, 1976.*

http://www.nih.gov/news/pr/sep2004/nichd-14.htm